Oregon Department of Human Services
INTELLECTUAL/DEVELOPMENTAL DISABILITIES

Farriintani waxaa iyada oo ah English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, TiếngViệt la soo geliyay https://go.usa.gov/xtBQC.

Luulyo 28, 2022

Ku socota: Shaqaalaha ODDS iyo hawl wadaagayaasha
Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS)
Ujeedada: Macluumaad cusub oo ku saabsan noocyada hay'ada guriga-dhexdiisa, ilo waxtar leh

Waxaa jiray waxyaabo badan oo dhawaanahan ku soo kordhay shaqada ODDS si loo cusbooneysiiyo oo loo ballaariyo noocyada guryaha-dhexdiisa ee loogu talagalay taageerada nolosha bulshada. Fadlan akhri farriintani loogu talagalay macluumaadka iyo ilaha si laguu caawiyo.

Taariikhda

ODDS waxay ka shaqeynaysay wanaajinta taageerada dadka qaba naafanimada maskaxda ama korriinka (I/DD) ee ku nool guryahooda gaarka ah ama qoyskooda. Iyada oo qayb ka ah dadaalkan, Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon (ODHS), oo ay ku jirto ODDS, ayaa taageeray Sharciga Senate-ka 1548.

Bishii Febraayo, Sharci dejinta Oregon ayaa ansixisay sharciga kaasi oo ku baaqayay kordhinta tayada iyo isla xisaabtanka iyada oo la hagaajinayo noocyada adeegyada guriga-dhexdiisa ee hadda jira lana dhisayo nooca "agency with choice" oo cusub. Iyada oo taasi laga jawaabayo, ODDS waxay bilowday wanaajinta adeegyada oo ay ku jiraan hagaajinta nooca hay'ada caadiga ah, oo hadda loo yaqaano nooca caadiga ah.

Waad mahadsan tihiin dhammaantiin, shaqaalaheena iyo hawl-wadaagayaasheena, ku hawlanaa shaqada adag ee mashruucani.

Noocyada adeegyada guriga-dhexdiisa

Marka ODDS iyo hawl-wadaagayaasheena dhammeystiraan shaqadani 2023, dadka qaba I/DD ee ku nool guryahooda gaarka ah ama qoyskooda waxay yeelan doonaan saddex fursadood oo kala doorasho oo loogu talagalay adeegyada guriga-dhexdiisa:

1. Nooca shaqaalaha taageerada shakhsiyeed (PSW) — Kala doorashadani hadda jirtaa waxay shakhsiga ama qofka dhigtaa in uu doorto cidda loo shaqeeyo ee mas'uulka ka ah shaqaaleysiinta iyo kormeerida adeeg bixiyayaashooda.
2. Nooca hay'ada caadiga ah (SMA) — Kala doorashadani daryeel bixiyaha-hay'ada ku saleysan waxaa la hirgeliyay Luulyo 1-, SMA-yada ayaa taageerooyinka maalinlaha ah siiya dadka iyo qoysaska ay dhici karto in aysan rabin in ay shaqaaleysiiyaan ama maamulaan daryeel bixiyaal u gaar ah. SMA-yada ayaa shaqaaaleysiiya , jadwalka sameeya, wax tababara isla markaana lacagta siiya xirfadlayaasha taageerada tooska ah, caawimaad ka geysta qorshayaasha shaqaaleysiinta, iyo bixinta adeeg heerkiisu sarreeyo.
3. Nooca hay'ada shaqo-bixiyaha ah (EMA) — Tani waa nooca "agency with choice" ee cusub ee loo yaqaano Sharciga Senate-ka 1548. Kala doorashadani, oo wakhtigan la joogo horumarintiisii lagu jiro, waxay noqon doontaa mid loogu talagalay dadka aan rabin in ay u shaqeeyaan diiwaanka cidda loo shaqeeyo balse raba jihaynta maalinla ah ee adeeg bixiyayaashooda.

Daryeel bixiye kasta ayaa mas'uul ka noqon doona shaqaalihiisa gaarka ah ee kula shaqeeya adiga. Dadka iyo qoysaska jecel daryeel bixiyayaashooda hadda ee aan lahayn waxyaabo ay doorbidayaan oo xoogan oo ku saabsan nooca sida fiican ugu shaqeynaya iyaga, waxaad awoodi doontaa in aad isku darto oo isku eegto noocyada daryeel bixiye. Isku duwahaaga adeegyada ama wakiilkaaga shakhsiyeed ayaa kaa caawin doona go'aankani.

Wakhtiga loo qabtay iyo jawaab celinta

ODDS waxay qaadatay xeerar ku meel gaar ah oo loogu talagalay SMA-yada oo dhaqan galaya Luulyo 1, 2022. Xeerarkani wuxuu waqtigoodu dhacayaa Diisambar 27, 2022. ODDS waxay sii wadi doontaa in ay si

dhow ula shaqeyso xubnaha ka tirsan bulshada si loo dejiyo xeerar ka hor inta aan la gaarin wakhtigaasi la qabtay.

Waxaanu qorsheynaynaa in la hirgeliyo xeerar joogto oo loogu talagalay EMA-yada iyo SMA-yada labadoodaba marka la gaaro Diisambar 27, 2022. Nidaamka sameynta xeerka joogtada ah waxaa ka mid ah guddiga tala-bixinta sharciga (RAC-yada), muddada faallooyinka dadweynaha iyo dhageysiga dadweynaha.

Waxaanu filaynaa qabashada RAC-yada inta lagu jiro toddobaadka Ogoosto 8 ama 15. Dadka oo dhan waa la soo dhaweynayaa in ay ka soo qayb galaan, laakiin waxaad fahamntaa in booska la helayaa uu yahay mid kooban. Waxaad awoodi doontaa in aad si dhakhso ah dhawaan iskaga diiwaan geliso bogga internet-ka ee Ka qayb qaadashada iyo Hal-abuurnimada ee ODDS.

Waxaanu sidoo kale la kulmi doonaa kooxaha u dooda naftooda si loo soo ururiyo jawaab celin dheeraad ah oo ku saabsan taageerada qofku is-jihaynayo. Tani waxay gacan ka geysan doontaa isku wargelinta horumarka kala doorashada EMA.

Waanu kula soo socod siin doonaa horumarkani iyo fursadahani.

Ilo loogu talagalay CME-yada iyo daryeel bixiyayaasha

Waxaan isku soo ururinaynaa waxyaabaha la adeegsado iyo ilo si ay CME-yada iyo hay'adaha daryeelka bixiya uga caawiso in ay caawiyaan dadka iyo qoysaskooda inta lagu jiro kala guurkani. Waxaanu sidoo kale abuuri doonaa ilo si hab toos ah loo caawiyo dadka iyo qoysaska lagulana wadaago kuwaasi internet-ka.

CME-yada iyo daryeel bixiyayaasha, ilahaaga waxaa laga helayaa bogga internet-ka, "Compass Project: Ilaha loogu talagalay Maamulayaasha Kiiska iyo Daryeel bixiyayaasha," ee cinwaankeedu yahay, "In-Home Agency Models." Ilaha hadda jira waxaa ka mid ah:

- Su'aalaha Inta Badan La Iska weydiiyo oo ku saabsan taageerada nolosha bulshada.
- Wada hadalka tilmaamaha dhanka caawimaada ee iskala talinta kala doorashada

Waxaanu soo gelin doonaa ilo iyo waxyaabo tusaale ah oo loogu talagalay shuruudaha cusub, sida horumarka la samaynayo iyo hirgelinta istiraatijadaha, marka aan dhammeystirno iyaga oo ay weheliyaan talooyinka CME-yada, daryeel bixiyayaasha iyo hawl wadaagayaasheena kale.

Fadlan su'aalahaaga ku hagaaji ODDS.Questions@odhsoha.oregon.gov.

Waad ku mahadsan tahay in aad nala shaqeyso si loo wanaajiyo adeegyadani.

Si Daacadnimo leh,

Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.